

Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare Kacaanka, 13 Maarso 1972, lamba. 58

Dhoofinta gaarka iyo goynta qiimaha xoolaha la doofinayo.

GUDDOOMIYAHA GOLAHASARE KACAANKA

Marka uu arkay Warqadda Koowaad iyo Labaad ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969;
Marka uu arkay Xeerka lamba. 34 ee 26 Juun 1970;
Marka uu tixgaliyay baahida loo qabo in la hirgaliyo nuxurka Qodobkalr. 4 baaragrafka
11 ee Xeerka lamba. 34 ee 26 Juun 1970;
Sida uu ku soo taliyay Wasiirka Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa;
Marka la dhagaystay Golaha Wasiirada;

WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1

Wakaaladda Horumarinta Xannaanada Xoolaha “L. D. A.” waa hay’adda keliya ee loo oggolyahay dhoofinta xoolaha nooca looda iyo in ay quudiso warshadaha maxalliga.

Qod. 2

Wakaaladda Horumarinta Xoolaha “L. D. A.” waxay siin kartaa cid saddexaad oo ay u aragto in ay awooddo una qalanto hawlaha ganacsiga xoolaha nool.

Qod. 3

Wasiirka Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa marka uu la tashado Wasiirka Ganacsiga wuxuu goyn karaa qiimaha xoolaha loogu talagalay dhoofinta.

Qod. 4

Dekereetadaan si deg-degga ayay u dhaqangalaysaa.

Muqdisho, 13 Maarso 1972.

Guddoomiyaha
Golaha sare kacaanka
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

Wasiirka Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa
Jaalle Dr. Saciid Ibraahim H. Saciid